IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad MUQDISHO 2 MAAJO 1980 L. —5

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

**QIIMAHA** : waa 5 shilin lnmbar walba **RUKUNKA** : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.

KOOBNIIN

## QAYBTA KOOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 14 ee 17 Feberaayo 1980, Warshadda Hargaha Hargeysa. BOGGA 558

SHARCI L. 15 ee 25 Febraayo 1980, Hargaha iyo Saamaha » 565

SHARCI L. 16 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 572

LAW N. 16 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 573

SHARCI L. 17 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 574

LAW N. 17 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 575

SHARCI L. 18 ee 5 Abriil 1980, Meel marin heshiis » 576

LAW N. 18 5th Apr. 80, Instrument of Ratification » 577

SHARCI L. 19 ee 15 Abriil 1980 Meel marin Heshiis » 578

LAW N. 19 15th Apr. 80, Instrument of Ratification » 579

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

SHARCI L. 15 ee 27 Febraayo 1980 Hargaha iyo Saamaha :

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY : Qodobka 82aad xubintiisa 14aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 2 ee 16kii Maajo 1973, Sharciga dhismaha Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lr. 20 ee 27.6.1967 (Veterinary Code).

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in loo dejiyo Xeer Hagaajinta tayada hargaha iyo saamaha, ilaalinta heliddooda, ganacsigooda iyo habeynta warshadeyntooda si loo tixgeliyo ujeeddooyinka Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha loo dhisay.

ISAGOO ARKAY : Tale-soo-jeedin W. H. S. lana tashaday Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga.

## WUXUU XEERAYAA

### QODOBKA 1AAD

Hargaha iyo Saamuhu waxay ka mid yihiin khayraadka dalka (National Resource), sidaas awgeed, waa in la hagaajiyaa tiro iyo tayoba.

### QODOBKA 2AAD

Waa in Ololaha Joogteynta Horumarinta Reer Miyiga lagu daro ka hortagga summadda hargaha waxyeelaynaysa, lagu hannuuniyo inay xoolaha ka suntan: Surka Dnka, Addimada hoose, Dhegaha iyo Tuurta.

Wakaaladdda Hargaha iyo Saamaha iyo Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa wax aalafarayaa inay u gudbiyaan talooyin lagaga reebayo dadweynaha dabka wax u dhimaya qiimaha hargaha.

### Qodobka *3aad*

### CUDURRA*D*A M*A*QAA*RK*A

### *(Skin diseases)*

Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha waxaa la farayaa inay u gudbiso Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dhirta iyo Daaqa wixii Cudurra ah ee maqaarka qiima dilaya, Wasaaradduna ka ciribtirtaa Xoolaha nool iyadoo ku kusameyneysa Cilmi Baaris Cudurrada maqaarka sida uu qorayo Qod. 4aad ee Sharciga lagu dhisay Wakaaladda Hargaha yio Saamaha.

### Qodobka *4aad*

### *B*AAH*I*N*T*A FAR*S*AMA*D*A D*A*RY*E*EL*K*A HARG*A*HA

Wakaaladda Hargaha yio Saamaha waa inay sameysaa shaqo dibadeed kuna baahisaa waddanka oo dhan farsamada daryeelka hargaha iyo saamaha iyadoo lasiinayo tababarro kala duwan, kawaanleyda, Ganacsatada iyo cid allaale ciddii ku lugle hargaha iyosaamaha, waana in la ciribtiraa wixii farsamexumi ah ee qiimahooda hoos u dhigaya.

### QODOBKA 5AAD

B. Waa in xoolaha oo dhan lagu qalaa xeryaha gawraca (Kawaannada) ee loogu talagaley, ciddii meel kale ku qasha xoolaha ee sharcigu u ogol yahay waa inay keenaan maqaarka meelaha loogu talagaley iibkooda iyo daryeelkooda.

T. Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Hormarinta Reer Miyiga waxaa la farayaa inay magaalooyinka iyo tuulooyinka ka dhisaan kawaanno qalliin oo u qalma gawrac xoolaha. Kawaanndu waxay suurto gelinayaan daryeelka xaabka xoolaha (Animal By-product), daryeelka Caafimaadka dadweynaha, nadaafadda guud iyo ururinta canshuuraha.

J) Waa in kawaannadu ka baxsanaadaan magaalada waana inay yeeshaan biyo ku filan.

X) Waa in xoolaha la qalaa waqti iftin ah. Way reeban tahay in xoolaha lagu qalo meel mugdi ah ama lagu qalo waqti mugdi ah. Waa in xoolaha dhakhtar eegaa intaan la dilin iyo markii la dilo hilibkoodaba.

Kh. Way reeban tahay in la qalo neef caato ah oo aan lahayn hilib iyo harag.

D. Neefka lagu soo gawraco meel ka baxsan kawaanka waa reeban tahay in la keeno kawaannada qalliinka iyo kuwa hilibka haddii aanu dhakhtar fasixin. ciddii lagu helaa waxay muteysatay ciqaab.

R. Xoola-qalayaashu waa inay noqdaan qaangaadh haystana ruqsad u gaar ah qallnka oo ay kaqaateen Dawladda Hoose.

## Qod. 6aad

## HARAG BIXINTA (Flaying)

B. Waa in haragga loo jeexaa sarmo toosan (Ripping ling) waa in haragga lagu saraa mindi caarad dhuuban laguna qalaa mindi jirdacsan oo aan wax yeelin, laguna hugaa gacanta si aanay haragga marnaba wax u gaarin.

T. Waa in haragga laga dhawraa dhiigga, uuska, wasakhda, daloolka, jeerarka iyo dhammaan wixii waxyeelaynaaya si uu san qiimihsu hoos u dhicin.

J. Qofka ku xadgudbaa wuxuu muteysanayaa ciqaab ama shaqadoo laga joojiyo.

X. Waa in haragga ariga iyo saamaha lo'da loo bixiyaa ballaar (open), waana reeban tahay in loo bixiyo Cokad. Ciddii si kale u bixisa ee aan ku dhaqmin habka xubinta ku xusan waxay muteysatay ciqaa bah ganaax iyo wixii la mid ah.

Kh. Saamaha Geela waa in loo bixiyaa laba gog iyo luqunta laguna bixiyaa ilaa jilbaha.

## Qod. 7aad

B. Waa inay Wakaaladdu ka caawintaa Dawladaha hoose qalabka qalliinka iyo dhismaha xiryaha gawraca

Qod. 8aad

QALLAJINTA HARGAHA IYO SAAMAHA

B. Hargaha iyo saamaha waa in lagu qallajiyaa hawo furan oo hadh leh ama cusbo iyadoo lagu cusbeynaayo ama lagu qallajinaayo meel ku habboon ee u qalanta. waa reeban tahay in lagu dhiso haragga dhulka dushsiisa (Ground drying) ama meel qorrax ah. Ciddii ku dhaqmi weyda sidaas waxa uu mutaysanayaa ganaax.

T. Waa in laga dhisaa guryaha qallajinta magaalooyinka iyo tuulooyinka meeshii ay gaadhaan xoolaha lagu qalaa 10 (Toban) neef maalintiiba.

J. Meelaha leh guryaha qallajinta hargaha wixii xoolo ah ee lagu qalo waa in hrgahooda lagu qallajiyaa. Waa reeban tahay in meel kale lagu dhiso hargaha. Ciddii ka hortimaada waxa ay mutaystay ganaax.

x. Hargaha iyo saamaha intaan la dhisin waa in la mayraa hilbaha laga dhammeeyaa.

kh. Hargaha iyo saamaha marka neefka laga bixiyo waa in Qalabka Qalliinka iyo dhismaha xeryaha Gawraca.

T) waa in aan dhulka la dhigin ee loo sameeyaa Shillaal dhulka ganacsiga iyo daryeelka hargaha iyo saamaha ka soo baxa degla dhisaa ama la cusbeeyaa oo aanay oolin muddo 4 saacadood ka badan si ayaan ugu dhalan Baktiiriyo. Ciddii ku dhaqmi weydana waxay muteysatay ciqaab ganaax ah iyo wixii la mid ah.

D. Habka loo dhisayo hargaha waa inuu ahaadaa ballac furan (Suspensios air dried), waana inaanu haraggu ka la dheeraan ee ay u muuqdaan si qeexan madaxa, afarta adin iyo dabaduba.

R. waa in ay wakaaladd uu gudbisaa habka cusub ee casriga ah dadweynaha ku lg leh hargaha iyo saamaha.

**Qodobka 9aad**

***KAYDINTA HARGAHA IYO SAAMAHA***

B. waa in lagu keydiyaa hargaha iyo saamaha bakharro qabow ee ku habboon.

waa in aan dhulka la dhigin ee loo sameeyaa Shillaal dhulka

J. Hargaha kayd ka ah waa in la laga ilaashaa cayayaanka reebka iyo qiiqa iyo wixii wax u dhimaaya oo dhan.

X. Waa in ay Wakaaladdu gaadhsiisaa sunta lagula dagaalamo cayayaanka meelaha lagu kaydiyo hargaha.

Kh. Ciddii dayacda hargaha ee ku kaydisa meel aan ku habbooneyn waxay muteysatey ciqaab.

D. Ganacsatada hargaha iyo kawaanleyda ka soo bixi weyda shuruudaha hargaha iyo saamaha waa laga qaadayaa shatiga gncsiga.

### Qod. *10aad*

### GAA*DI*IDK*A* HARGU*H*U *S*AARAN Y*I*H*I*IN

B. Gaadiidka sida hargaha waa reeban tahay inay qaadaa alaab kale iyo dad rakaab ah, gaar ahaan biyaha, caanaha, naaftada, dhuxusha IWM.

## QAYBTA LABA*AD*

## *M*AAMUL*K*A GANACS*I*GA

## HARGA*HA* *I*YO SAAMAH*A* IYO I*LA*ALIN*T*OODA

### Q*OD*OB*K*A *11*AAD

B. Dhammaan hargaha iyo saamaha ka soo baxa dalka guhiisa waa inay soo galaan gacanta Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha. Ciddii ka hortimaada ee meel kale u wada ama geysa waxay mutaysatay ciqaabah ganaax, xarig iyoo hargaha oo lagal wreego.

T. Cidda ka ganacsanaysa hargaha ha ahaadeen : Iskaashato, Shirkad ama Ganacsade gaar ahaaneed waa inay yihiin dad lagu aamini karo daryeelka hargaha soona gaadhsiinaya Wakaaladda ee aan meel kale geyneyn.

J. Dadka hargaha ka ganacsada waa inay leeyihiin Shati u gaar ah ganacsiga hargaha iyo saamaha oo ay ka qaateen Dawladaha Hoose ee Degmooyinka.

X. Cid aan ogolaansho ka haysan Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha ama cid ay wakiilatay looma siin karo Ruqsad Ganacsiga Hargaha iyo Saamaha.

Kh. Waa reeban tahay inay ka ganacsadaan hargaha cid aan Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya dhexdeeda ku jirin oo u lahayn Shati.

**QODOBKA 12AAD**

B. Waxa la farayaa Dawladaha Hoose inay xil iska saaraan ogaalka xaaladda hargaha ka soo baxa degmooyinkooda tiro iyo tayoba iyaga oo diiwaan gelinaya. Wakaaladda Hargaha iyo saamuhuna waa inay og tahay lana socotaa hargaha soo baxa Gobollada, Degmooyinka iyo Tuulooyinka tiro iyo tayoba iyo waxay ku sugan yihiin.

**QODOBKA 13AAD**

B. Hargo iyo saamo kasta oo gaadiid saaran oo u kala socda dalka gudihiisa waa inay la socotaa warqad caddeyn ah oo muujinaysa : Tirada, Nooca, meesha ay ka keeneen iyo meeshaay ku socdaan. Warqaddaas oo ay bixiso Dawladda Hoose ay ka yimaadeen ama Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha.

T. Haddii harguhu wataan warqad caddeynaysa in laga soo cashuuray degmadii ay ka yimaadeen lagama qaadi karo cashuuur labaad intay ka keenayaan Xarunta Wakaaladda.

J. Waa reeban tahay in loo qaado hargaha meel ka dadban Saldhigyada Wakaaladda. Wixii hargo iyo saamo ah ee loo wado meel ka dadban Saldhigyada Wakaaladda ciddii ku kacda arrintaas oo ay ku caddaato inay u wadeen hargahaas meel kale oon Saldhigyada Wakaaladda ahayn waxay mutaysadoontaa ciqaab culus iyo hargaha oo lala wareego.

X. Ciddii lagu ogaado ama lagu helo iyaga oo qarinaya hargo ay damacsanaayeen in qarsoodi ay dibedda uga saaraan dalka waxay mutaysanayaan ciqaabta ku xusan Qod. 13aad Xubintiisa J.

Qodobka 14aad

B. Hargaha iyo Saamaha nooc kasta ha ahaadeene sida kuwa Ariga, Lo'da, Geela, Ugaarta, Yaxaaska, Libaaxbadeedka iwm weey rooban tahay in ay waddanka ka saarto cid aan ahayn Wakaaladda Hargaha iyo Saamaha ama aan ahayn cid ka

T) Cid allaale ciddii lagu soo caddeeyo inay hargo ama saamo ka saarayeen Waddanka iyo ciddii gacan ku siisay waxay mutaysanayaan ciqaab ah ganaax iyo Xarig.

J) Qofka lagu helo in uu hargaha iyo saamaha ku iibsanayo ama ku iibsaday qiimo ka sareeya kan Wakaaladdu ku iibsato wuxuu mutaysanayaa ganaax ama xarig iyadoo loo qaadanayo inuu qofkaasi u wado hargaha meel aan ahayn Wakaaladda.

**Qodobka 15aad**

Qofkasta oo ku xadgudubta Xeerkan waxaa lagu qaadayaa Qod. 505 ee Sharciga Ciqaabta (Penal Cede) .

**Qodobka 16aad**

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa markuu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 27 Feberaayo 1980

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

**DIMUQRAADIGA SOOMAALIYA**

**JAALLE MAXAMED SIYAAD BARRE**